



\$450 Coronavirus (COVID-19) kaalmada baarista

\$450 Coronavirus (COVID-19) testing support – Somali

Baaritaan lacag la'aan u ah qof walba

Baaritaanka coronavirus-ku qof walbaa wuxuu ku heli karaa **lacag la'aan**. Tan waxaa ka mid ah dadka aan haysan medicare-ka, sida dadka dibada ka yimid oo booqashada ku jooga, shaqaalaha soogalootiga ah ama kuwa magangelyo doonka ah.

Haddii aad qabto astaamaha coronavirus-ka (COVID-19) waxaa waajib kugu ah inaad isbaarto.

Haddii aad isbaarto, waxaad ka heli kartaa caawima dhaqaale xukuumada Fiktooriya

Markaad samayso baaritaanka coronavirus-ka (COVID-19) waxaa waajib kugu ah inaad joogto guriga ilaa aad ka hesho natiijoyinka. Waxaad ka bixi kartaa guriga keliya haddii ay tahay degdeg. Shaqo ma aadi kartid.

Haddii aad ka welwelayso inaad lumiso lacagtii kaa soo gelaysay shaqada intaad sugayso natiijada baaritaanka, waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay \$450 oo ah kaalmada dhaqaale ee coronavirus-ka (COVID-19) ee Xukuumada Fiktooriya.

Kaalmadaan waxaa heli kara shaqaalaha kuwaas oo aan haysan fasax jiro oo ay isticmaali karaan. Tan waxaa ka mid ah shaqaalaha marmarka shaqeeya, kuwa kunturaada ku shaqeeya iyo kuwa uu ka dhamaaday fasaxa jiradu.

Qof kasta oo ku nool Fiktooriya ayaa heli kara kaalmadaan – Maaha inaad tahay muwaadin Australiyaan ama qof haysta deganaasha rasmi ah.

Haddii la ta'kiidiyo inaad qabto coronavirus (COVID-19) ama ku dhowayd qof qaba coronavirus (COVID-19), waxaad u baahan doontaa inaad isgooni-yeesho mudo. Waxaana laga yaabaa inaad awoodo inaad hesho \$1500 oo ah lacagta kaalmada.

Xukuumada Fiktooriya ayaa iyaduna siinaysa kaalmo dhaqaale shaqaalaha u baahan inay daryeellaan carruur loo sheegay inay guriga joogaan, waxaad kaloo heli kartaa kaalmo haddii aadan aadi karin shaqo aadna lumin doonto mushaharkii.

Macluumaad intaas ka badan ama inaad dalbato, wac Khadka coronavirus-ka oo ah 1800 675 398 ama booqo www.dhhs.vic.gov.au/covid-19-worker-support-payment.

For information in other languages, scan the QR code or visit
DHHS.vic – [<Translated resources - coronavirus \(COVID-19\)>](http://Translated resources - coronavirus (COVID-19))
<<https://www.dhhs.vic.gov.au/translations>>



If you need an interpreter, call TIS National on 131 450

For any questions

Coronavirus hotline 1800 675 398 (24 hours)

Please keep Triple Zero (000) for emergencies only

OFFICIAL



Health
and Human
Services

To receive this document in another format phone 1300 651 160 using the National Relay Service 13 36 77 if required, or [email Emergency Management Communications <em.comms@dhhs.vic.gov.au>](mailto:em.comms@dhhs.vic.gov.au).

Authorised and published by the Victorian Government, 1 Treasury Place, Melbourne.

© State of Victoria, Australia, Department of Health and Human Services, 16 October 2020.

Available at <https://www.dhhs.vic.gov.au/translations>